

# Gudniinka wiilasha – warbixinta waalidka

## Xeerka gudniinka wiilasha ee aan ku salaysnayn caafimaad

Xeerka (2001:499) waxa uu sheegayaa in gudniinka wiilasha uu samayn karo oo kaliya dhakhtar aqoonsi leh ama qof ay Hay'adda maamulka bulshadu siisay ogolaansho gaar ah. Haddii qof kale uu sameeyo gudniin, waxa uu qofkaasi mudan karaa ciqaab.

Dhakhtarku inta aanu samayn gudniinka waa in uu waalidka siiyaa warbixin ku sahabsan hawshu uu qaban doonaa waxa ay tahay. Haddii wiilku uu leeyahay laba waalid waa in ay labaduba rabaan samaynta gudniinka.

Dhakhtarku waa in uu waliba isku dayaa inuu ogaado waxa uu wiilku ka qabo iyo rabitaankiisa haddii uu gaadhay da'da uu ku sheegan karo arrinkaas. Lama gudi karo wiilka muujiya in aanu rabin gudniinka.

Wiilka waa in la siiyaa dawada xanuunka yaraysa. Waa in meeshu nadiif u ahaataa sida meelaha kale ee qalliinka, sharcigooduna waa isku mid.

La hadal kalkaalisadaada xarunta caafimaadka carruurta haddii aad rabto war dheeraad ah.

## Gobolka Örebro

Maamulka caafimaadka gobolka Örebro waxa uu go'aansaday in daryeelka caafimaadka ee dawladdu aanu samaynin gudniinka wiilasha ee ku salaysan dhaqanka ama diinta.

Waxa aan ugu horayn idiin tilmaamaynaa Läkarhuset, Odenplan i Stockholm. Halkaas oo lagu gudo carruurta ka yar 3 bilood ama culayskoodu ka badan yahay 15 kg (qiyaastii 2 jir).

---

### Ciwaanka

**Barnkirurgi**  
**Läkarhuset Odenplan**  
**Odengatan 69**  
**113 22 Stockholm**  
<http://barnkirurgen.se/>

### Telefoonka

**08-587 102 70**

---

## Kharashka

- Carruurta ka yar 3 bilood marka la gudayo waxa la suuxinayaa meesha oo keli ah kharashkuna waa **3 500 kr**.
- Carruurta ka wayn 2 sano marka la gudayo waa la wada suuxinayaa kharashkuna waa **6 500 kr**.

Reerka ayaa iska bixinaya kharashka gudniinka.